



Ururka Laanqayrta Cas ee Finland

FOOMKA BAAFINTA EE BBC

Golaha Caalamiga ah ee Ururka Laanqayrta Cas iyo BBC ayaa si wadajir ah u soo daaya barnaamij idaacadda laga soo daayo oo 15 daqiiqo ah oo dadka la la' yahay laga baafiyo. Barnaamijka todobaadkiiba lix mar baa la soo daayaa. Barnaamijka waxaa laga soo daayaa mowjadda gaaban ee BBC ee Soomaaliya. Barnaamijka waxaa laga soo daayaa dadka la la' yahay iyo dadka raadinaya magacyadooda. Maalmaha Sabtiyada iyo Khamiisaha barnaamijka waxaa la soo daayaa saacadda (5:15- 5:30 galabnimo). Axadaha ilaa Arbacooyinka sida caadiga ah waxaa la soo daayaa saacadda 5:30 -5:45 galabnimo).

Barnaamijka BBC waxay tahay in la isticimaalo, marka nidaamka raadinta lagu heli waayey dadkii ama wararka la bixiyey aanay ku filnayn in nidaamka raadinta la bilaabo.

Baafinta BBC waxaa la isticimaali karaa, haddii

- 1) Xiriirku uu lumay wixii ka dambeeyey dagaalkii 1987 ee Somaliland ka dhacay ama wixii ka dambeeyey dagaalkii 1991 ka dhacay Soomaaliya.
- 2) Laysku dayey in la diro fariinta laanqayrta cas, laakiin ay fariintu soo noqon weydey. Nidaamka raadinta dadka ayaa laysku dayey in lagu raadiyo, laakiin wax maxsuul ah kama soo bixin ama
- 3) Qofka raadinayaa wararkuu bixiyey aanay ku filnayn, in la bilaabo fariinta laanqayrta cas ama raadinta dadka, ama haddii qofkii wax raadinayey uu dhintay, ama haddii qofkii la raadinayey uu u guurey sida Itoobiya oo kale, oo aan wax kale oo war ah laga hayn
- 4) Qofka la raadinayaa waa inuu qof ehelka ah ahaadaa (mid waafaqsan sida ay Soomaalidu qoyska u yaqaannaan)
- 5) Wararka foomka ku qoran hal mar baa idaacadda laga sii daayaa.

Sida wax loo samaynayo

1. Ururka Laanqayrta Cas ayaa foomamka siinaya dadka adeegga u baahan
2. Foomamka oo la soo buuxbuuxiyey ayaa lagu soo celinayaa Xafiiska Dhexe ee Ururka Laanqayrta Cas ee Finland oo waxaa lagu soo qorayaa cinwaanka ah: SPR henkilötiedustelut PL 168, 00141 Helsinki. Ururka Laanqayrta Cas ee Finland wuxuu foomamka si loo diwaangeliyo u Golaha Caalamiga ah ee Ururka Laanqayrta Cas. Qoladaasina foomamka waxay u sii dirayaa BBC: Somali Service, Nairobi.
3. BBC Somali Service ayaa foomamka kala soocaysa, dadka la la' yahay magacyadoodana waxaa laga sii daayaa barnaamijka idaacadda, iyadoo gobol gobol ah. Marka idaacadda laga sii daayo ka dib, foomamku waxay si loo kaydiyo, dib ugu soo noqonayaan Golaha Caalamiga ah ee Ururka Laanqayrta Cas.
4. Haddii dadka la raadinayaa magacooda ka maqlaan idaacadda, waa inay la soo xiriiraan xafiiska ugu dhow ee Ururka Laanqayrta Cas oo ay halkaas Fariinta Laanqayrta Cas uga diraan qofkii raadinayey

